

# Dhiirigalinta Kharash-Garayn Caqli Badni iyo Furfurnaan leh



## Samaynta nidaam bixiya lacagta caafimaadka oo maalgaliya dhanka sinnaanta caafimaadka

Qorshaha Caafimaadka Oregon waa u bilaash xubnaha, waxaana lacagta bixiya gobolka iyo dawladda fadaraalka. Sanad kasta, bixinta daryeelka caafimaadku wuu sii qaaliyoobayaa. Inta kharashku sare u kaco sanad kasta waxa loo yaqaan “heerka korriinka.”

Oregon hoos ayey u dhigtay heerka korriinka iyadoo siinaysa kharashka ururada daryeelka abaabulan waxa loo yaqaan “miisaaniyad guud” halkii ay ka bixin lahayd adeegga shakhsi kasta oo ay siiyaan xubnaha. Tani waxay siisaa ururada daryeelka abaabulan furfurnaan dheeri ah oo ku aaddan halka ay miinaayidda u qoondeeyeen. Tusaale ahaan, waxay ku bixin karaan lacag *kahortaggida* xanuunka, halkii ay lacag ku bixin lahaayeen *daawaynta* xanuunka.

Maadaama tani si wacan u shaqaysay, Oregon waxay diyaar u tahay inay qaaddo tallaabada xigta: siinta ururada daryeelka abaabulan “miisaaniyad guud oo qiime ku salaysan.” Tani waxay ka dhigan tahay in ururada daryeelka abaabulan ay isku duwi doonaan daryeelka xubnaha ee dhammaan adeegyada caafimaadka ee jireed, habdhaqan, iyo afka, oo gacan ka gaysan doonaan daboolidda baahiyaha kale ee aasaasiga ah ee saameeya natiijooyinka caafimaadka, sida guryeynta iyo cuntada.

## Xeeladaha lagu abuuraayo miisaaniyado furfuran, oo qiime ku salaysan oo loogu talagalay CCOs si loo taageero sinnaanta caafimaadka

Hoos waxa ah xeelado qaar oo Maamulka Caafimaadka Oregon uu qorshaynayo inuu oggolaansho ka waydiisto dawladda fadaraalka uu ku sameeyo:

1. **Ku dhiirigali CCOs inay ku maalgaliyaan wax badan daryeelka caafimaadka la xiriira ee horumarinaya natiijooyinka caafimaadka iyo nolosh.** Gaar ahaan, Oregon waxay doonaysaa inay shardi uga dhigto ururada daryeelka abaabulan inay ku bixiyaan ugu yaraan 3% ka mid ah miisaaniyadaha guud ee qiimaha ku salaysan maalgalinaha sinnaanta caafimaadka, taasi oo qayb ka mid ah loo weecin doono dhanka kooxaha bulshada ku salaysan oo loo yaqaan iskaashiyada maalgalinta bulshada (CICs). Eeg [quudmarka Maalgalinaha Sinnaanta ee Jihaysan](#) si aad uga ogaato wax badan oo ku saabsan CICs.

### Qeexdimaha Muhiimka ah

**Miisaaniyad guud:** Qalab loo isticmaalo in lagu siiyo ururada daryeelka abaabulan furfurnaan ay ku go'aamiyaan halka ay u malaynayaan inay ugu fiican tahay in lacag la galiyo si loo ilaaliyo caafimaadka dadka loona gaaro cabbirada (yoolasha) la dejiyey iyadoo la kaashanayo guddida cabbirada gobolka iyo dadwaynaha.


**Miisaaniyadda guud ee qiimaha ku salaysan:** Miisaaniyadahan guud waxay dhiirigaliyaan ururada daryeelka abaabulan (CCOs) inay ku xiraan xubnaha OHP adeegyada caafimaadka la xiriira, sida guryeynta iyo cuntada.

2. **Sii CCOs miisaaniyad guud oo fudud oo aad loo saadaalin karo.** Marka ururada daryeelka abaabulan (CCOs) ay ogaadaan waxa miisaaniyaddoodu noqon doonto, waa mid sahlan oo halisteedu yar tahay inay ku sameeyaan maalgalino muddo dheer sinnaanta caafimaadka, kahortagga cudurka, iyo horumarinta bulshada. Maalgalinahani waxay keenaan xubno caafimaadkoodu fiican yahay iyo kharashaad daryeelka caafimaadka oo hooseeya marba marka ka dambaysa.
3. **Xakamayn fiican ee kharashaadka daawada dhakhtarku qoro.** Oregon waxa uu samayn doontaa hanaan lagu siinayo xubnaha daawo caafimaad ahaan la xaqiijiyey inay waxtar leeyihiin, iyadoo sidoo kale xakamaynaya kharashka daawooyinka la qoro.

## Waxa ay tani uga dhigan tahay xubnaha OHP

Marka ururada daryeelka abaabulan (CCOs) ay keydiso ayadoo ka kahortageysa xanuunka dartii, Oregon markaas waxay lacagahan soo haray ku maalgalin kartaa waxa loo yaqaan “maalgalinaha sinnaanta jihaysan.” Maalgalinahan waxay gacan ka gaysan doonaan bixinta adeegyada caafimaadka la xiriira (sida taageerada caafimaadka dhimirka, caawinta guryeynta, khayraadka shaqaalaynta, iyo waxyaalo kale), kuwaasi oo ka caawin doona Oregon inay gaarto yoolkeeda ah inay tirtiro sinnaan la’anta caafimaadka Meesha lagu gaaro 2030. Tani waxay ka dhigan tahay xubnaha OHP inay sii wadi doonaan inay helaan daryeel caafimaad oo tayadiisu sarrayso iyo inay galaangal u yeeshaan adeegyada caafimaadka la xiriira.

**Halkan waxaa ah waxa ay u eg tahay:**



Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad weyn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Community Partner Outreach Program [community.outreach@dhs.ohio.state.gov](mailto:community.outreach@dhs.ohio.state.gov) ama adigoo wacaya 1-833-647-3678. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalka dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.